

Beddelka qalabka cabbirka

Cinwaanka xarunta Lambarka aqoonsiga xarunta

Shirkadda korontada Elnät ee gobolka Västerbergslagen waxay beddeleysaa dhammaan qalabka cabbirka korontada quwaddoodu gaareyso ilaa 63 A. Ujeeddada laga leeyahay shaqadaan ballaaran ayaa ah in la buuxiyo shuruudaha mustaqbalka ee qalabka cabbirka korontada. Qalabka cusub oo guriga laguugu rakibay wuxuu soo gudbinayaa qiyaasta saacaddiiba iyo weliba in uu cabbiro socodka iyo tayada korontada gurigaaga..

Koronto-cabbiraha cusub, Omnipower, waxaa soo saara shirkadda daanishka ah ee Kamstrup oo weliba ay mas'uuliyadda ugu weyni ka saaran tahay beddelidda iyo ka-shaqaysiinta qalabka cabbirka. Waxay wakiilatay shirkadda Vattenfall Services Nordic oo iyadu beddeli doonta cabbiraha gurigaaga. Beddelidda qalabka cabbirka korontada xaafaddaadu wuxuu soconayaa inta u dhexeysa [taariikh] ilaa [taariikh].

Waxaa la qiyaasayaa inay shaqadu qaadan doonto nus saac iyo 15 daqiiqo oo korontadu maqnaan doonto. Habka qalabka cabbirka loo rakibay iyo bilaabidda cabbirka korontada waxaa lagu soo qorayaa warqadda lacagbixinta oo lagu soo diri doono oo aad ka akhrisan karto barta Mina Sidor oo aad ka geli karto bartayada internet.

Lacag-la'aan ayaana gebi ahaan laguugu rakibayaa qalabkaas cabbirka korontada.

Haddii qalabkaasi ku rakiban yahay guriga gudahiisa ama meel qufulan oo aysan shirkadda Vattenfall Services Nordic soo geli karin, waxaa lagugu talinayaa inaad sida ugu dhaqsaha badan uga la xiriirto telefoonka 08-739 77 87, oo saacadaha telefoonku yahay 8:00–15:00, si aad u qabsato waqti ku habboon oo qalabkaas lagaa beddelo. Xataa shirkadaha ganacsiga oo baahi gaar ah qabi kara marka korontadu istaagto waxay sida ugu dhaqsaha badan u la xiriirayaan shirkadda Vattenfall Services Nordic.

Macaamiisha xilliyada qaarkood iska xira qalabka cabbirka korontada waxaa lagu talinayaa inay isticmaalaan korontadamiyaha ku jira qalabka cabbirka si xiriirka qalabku mar walba u shaqeeyo.

Wixii su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan beddelidda qalabka cabbirka korontada waxaad kala xiriireysaa Xafiiska adeegga macaamiisha oo telefoonku yahay 0771-98 70 00 ama e-meylka info@vbenergi.se.

Salaan diirran

**Mikael Boström
Västerbergslagens Elnät AB
Cabbirrida/xisaabinta**